sub=juqraafi

S1=waa maxay cilmiga jiyoolojiga?

J1=cilmiga jiyoolojiga waa aqoonta ama cilmiga la xiriira barashada ama daraaseynta isbedelada iyo dinaamikida [dhaq dhaqaaqa] dhulka iyo ilaha tamarta ee dhulka ku dhex jira

S2=cilmigaani muxuu daraaseeyaa?

J2=cilmigani waxa uu daraaseeyaa waxyaabaha ka qeybqaatay qaabsameysanka dhulka laga soo bilaawo kuma naan sano ka hor iyadoo loo cuskanaayo daraaseynta dhadhaabyada dhulka taa oo lagu tiriyo in ay tahay arkiifiya (archive)taariikheed oo dhulku leeyahay

S3=sheeg laamaha cilmiga jiyoolojiga?

J3=laamaha cilmiga jiyoolojiga waxaa kamid ah:jiyoolojiga bay,ada,jiyoolojiga hansada,iyo jiyoolojiga waxbarashada

S=sheeg jiyoolojiga bey,ada?

J=cilmigaani wuxuu quseeyaa barashada iyo daraaseynta carada,biyaha iyo in laga shaqeeyo xal u helida iyo maareynta meelaha ku wax yeelooway washaqowga deegaanka

S=jiyoolojiga hansada?

J=Cilmigaani waxa uu utaaganyahay in xeela dheerayaasha jiyoolojiga ay qeyb ka noqdaan helitaanka qorsho mustaqbaleed oo la xiriira waxyaabaha laga dhisayo guryaha,buundooyinka,wadooyinka iyo biyo xireenada ka dib marka la daraaseeyo awooda dhadhaabyada

S=jiyoolojiga waxbarashada ?

J= qeybtaani waa qeybta aynu ku arkeyno isla markaana aynu ku daraaseyneyno heerarka kala duwan ee waxbarashada asaasiga ah iyo tan jaamacadeed

S=jiyoolojiga saliida iyo dhaqaalaha?

J=laankamidah laamaha cilmiga jiyoolojiga ee ka hadasha ama quseeya ilaha tamarta dabiiciga ah sida saliida,dhuxusha ,alaabta ceydhiinka ah iyo gaaska dabiiciga ah

S=sheeg waayaha jiyoolojiga iyo ahmiyadooda ?

J=xeeldheerayaasha cilmiga jiyoolojiga waxay isku raaceen in da,da dhulka looqeybiyo afar waa

S=muxuu u qeybsamaa waa’kasta iyo xilikasta?

J=waa kasta wuxuu uqeyb samaa xiliyo , waa kasta iyo xili kasta wuxuu leeyahay koox dhadhaab lakabeed ah,nolol xeywaan iyo mid dhir oo isaga ugaar ah taa oo uu kaga duwanyahay lakabyada kale

S=imisa ayaa lagu qiyaasaa da,da dhulka?

J=da,da dhulka waxaa lagu qiyaasaa 2000 milyan sano ,halka qolofta dhulka da,deeda lagu qiyaaso 1500milyan sano

S=mxay ku suuro gashay in la qiyaaso da,da dhulka?

J=in la qiyaaso da,da dhulka waxay ku suuro gashay daraaseynta waxyaabaha haraadiga ah ama foosiliska (fossils)kuwaa oo laga helay meelo kala duwan oo dhulka hoostiisa ah

S=maxaa suuro gal ah in taariikhda dhulka loo qeybiyo?

J=waxaa suuro gal ah in loo qeybiyo taariikhda dhulka dhoor qeybood oolooyaqaan waayada jiyoolojiga

S= maxaa loo yaqaan kambiryaanka horeeya?

J=kambiryaanka horeeya waxaa loo yaqaan waaga ka horeeya waaga koowaad wax badan lagama ogo dhererka waa gan

S=maxaa la rumeysanyahay in dhulka uu ku dhacay?

J=waxaa la rumeysanyahay in dhulka uu ku dhacay is bedelo aad u badan dhadhaabyadiisana lagama helin wax muujinayo in waagani nolol ay jirtay

S=sheeg ahmiyada dhaqaale ee waagan?

J=dhulku sameysmay ama dhadhaabyada waagani waxay ka koobanyihiin macaadiin aad qaali uah sida dahabka,qalinka,maarta,sinkiga,birta,karoomka,niikalka,tiinka,balambamka iyo qaarkamid ah macaadiinta shucaaca bixisa

S=sheeg waagii baaliyosooiga ?

J=waa lagu tilmaamaa inuu ahaa waayada jiyoolojiga kan ugu dheer

S=sheeg noocyada noole ee waagaa jiray?

J=waxaa la rumeysanyahay noocyada noole ee waagaa jiray inay aad uyaraayeen isla markaana dug baxa waagaani uu ahaa mid aad gaabis u ah

S=maxaa ka mid ah xiliyada uu waagani ka koobanyahay?

J=xiliyada uu waagani uu ka koobanyahay waxaa ka mid ah xiliga kambiriyaanka,xiliga jordonofishka,xiliga siluriyaanka,xiliga difoniyanka,xiliga kaarboonka ,iyo xiliga bermiyanka

S=sheeg ahmiyada dhaqaale ee waagan?

J=dhadhaabsameysanka xiligani wuxuu ka koobanyahay ceydhiinka macaadinta birta iyo maganiiska

S=maxaa kale ee waagani leeyahay ?

J=sidoo kale waxaa laga helaa faar dhuxul ah waxay ku filiqsantahay meelaha laga qodo dhuxushaan

S=mxaa ka mid ah meelaha laga qodo?

J=meelaha laga qodo waxaa ka mid ah yurub,shiinah,dalakamidowga soofiyeetiga hore iyo koonfur afrika sidookale waxaa laga helaa xadi aad uyar meelo kamid ag dhulalka carabta sida yaman iyo sacuudi carabiya

S=sheeg waaga labaad ama waagii nolosha dhexe?

J=dherer ahaan waxa uu ka gaabanyahay waagii isaga ka horeeyay ,waxaa jiray xoogaa gaabis ah intii lagu jiray waagaani

S=maxaa soo maray dunida?

J=waxaa dunida soo maray wax badan oo nooleyaal ah

S=maxaa kamidah xiliyada waagaani ?

J=xiliyada waagani waxaa kamid ah xiliga tirisiga ,juraasiga,iyo xiliga kiritaasiga

S=muxuu fidsanyahy waagaani?

J=waagaani wuxuu fidsanyahy 160milyan

S=sheeg ahmiyada dhaqaale ee waagani?

J=saliida waxa ay kamidtahay macdanta sameysmay waagani gaar ahaan xiliga kiritaasiga taa oo lagu tiiriyo isha ugu muhiimsan tamarta manta dunida laga isticmaalo

S=sheeg waxyaabaha kale ee waagani sameysmay?

J=waxaa samaysmay birta ceydhiinka ah ,foosfaytka,iyo dhadhaabta loo yaqaano balestarka

S=sheeg dhererka waaga sedaxaad ?iyo inta wagaa lagu jiray waxa dhacay?

J=dhererka waaga sedaxaad (kinozoi) xaga dhererka waxa uu ka gaabanyahay waaga labaad, intii lagu jiray waagani waxaa dhacay is bedelo aad u xoog badan oo ku dhacay qolofta dhulka

S=mxaa kale oo soo ifbaxay intii lagu jiray waaga sedaxaad?

J=waxaa soo baxay taxane buuro ah sida buuraha(ALBEE)ee kuyaala yurub rookie iyo andiis oo kuyaal qaarada ameerika

S=imisa ayaa lagu qiyaasa da,da waagani?

J=da,da waagaani wxaa lagu qiyaasa 63milyan oo sano

S=goormaa ayay dhirtu yeelatay muuqaalka manta?

J=waagani waxa uu ukala baxaa dhoor xiliyo,waagani waa waaga dhirta ubaxa leh iyo haraadiga abuurada sidoo kale waa waaga dhirta dabiiciga ah ay yeelatay muuqaalka manta ay leedahay

S=maxaa kamid ah ahmiyada dhaqaale ee waagani?

J=muhiimada dhaqaale ee waagani waxaa sabab u ah sameysanka dhagaxa,nuuriyada iyo dhagaxa dhoobada ah ,ooloo adeegsado soo saarista sibidhka ama shamiidada iyo isticmaalka balaastikada kaa oo loo adeegsado dhinacyo badan

S=mxaa kale oo ka mid ah ahmiyada waagani?

J=waxaa kamid ah sameysanka salfarka ceydhiinka,sinkiga,balambamka iyo saliida

S=waaga cusub?

J=guud ahaaan waa kan ugu waqtiga gaaban dhamaan waayada jiyoolojiga

S=mxaa dhacay intii lagu jiray waaga cusub?

J=waxaa dhacay waxa loo yaqaan waagii barafka xiligaa oo barafku uu ku faafay ameerikada waqooyi yurub iyo asiya sidoo kale waxaa dhacay waxa loo yaqaan waagii roobka xiligaa oo roobab ma hiigaan ah ay ka da een waqooyiga afrika iyo koonfur galbeed aasiya

S=goormaa ayuu soo ifbaxaybilawga waagani?

J=waxaa la rumeysanyahay bilowga waagani inuu soo ifbaxay aadanaha (EEBBE abuuray)

S=imisa ayuu gaaraa dhererka waagani?

J=waxa uu gaaraaa 3milyan sano

S=imisa xili ayaa look ala saraa waagani?

J=waxaa look ala saaraa labo xili oo kala ah xiliga baliyostostiinka,iyo xiliga cusub

S=imisa ayaa lagu qiyaasaa xiliga baliyostostiinka ?

J=waxaa lagu qiyaasaa da diisa 2milyan oo sano

S=sheeg waaga xiliga cusub?

J=wxaa lagu qiyaasaa da diisa 1milyan oo sano waa xiliga nooluhu ay gaareen heerkoodu ugu sareeya waana xiliga aadanaha manta jira

S=sheeg ahmiyada dhaqaale ee waagani?

J=waxaa loo adeegsadaa faarkiisa(sediment)gaar ahaan kuwa kuwa sibsibka ah,qururuxa,carada iyo dhoobada in lagusimo wadooyinka iyo iyo sameynta lebenka

S=faarka wabiga maxaa loo adeegsadaa?

J=faarka wabiga waxaa loo adeegsadaaa carada beeraha oo aad usareysa carro sanimadeeda

S=maxaa ka mid ah waayada jiyoolojiga kuwaa oo nabarayo taariikh iyo duugbax?

J=waayada jiyoolojiga kuwaa oo nabarayo taariikhda iyo duugbaxa qolofka dhulka waxaa ka mid ah 1=habka ay ku sameysmeen qaaradaha iyo sida ay usameysmeen muuqaalkooda hada jira 2=isku ekaanshaha weyn ee xaga jihada ay ujeedaan taxanaha buuraleyda rookie

cubeya

waqooyiga ameerika iyo buuraleyda andiis ee ameerikada koonfureed 3=tilmaamida da,da lakabyada dhadhaabah ay ku jiraan foosaliska ama haraadiga noolaha iyo in la ogaado xiliga ay noolaayeen

S=sheeg dadaalada culimada muslimiinta?

J=culimada muslimiinta waxay ku dhiseen cilmiga jiyoolojiga qaab maangal ah oo aadna u haboon taa oo ka duwan qaabkii ay cilmiga jiyoolojiga ay ku dhiseen gariiga kuwaa oo cilmiga jiyoolojiga u cuskaday habku dhisan quraafaad iyo sheeko baralleey,

S=goormaa ayay muslimiintu cabireen dhexroorka dhulka?

J=sanadka markuu ahaa210hijriga ku began 825CD muslimiintu waxay sameeyeen in ay cabiraan dhex roorka dhulka, sidaa oo kale waxay cabireen wareega dhulka,natiijada kazoo baxdayna waxay u dhaweed natiijooyinka ay soosaareen saynisyahaanada casriga ah

S=saynis yahaanka ween muxuu kaga sheekeeyay buugiisa?

J=saynis yahaanka ween ibnusinaa wuxuu kaga sheekeeyay buugaagtii uu qoray gaarkood cilmiga dhulka sida buugiisa ALSHIFA halkaa oo qeybta macaadinta iyo raadadka sare kaga sheekeeyay dhul gariirka noocyadiisa iyo waxyaabaha dhulgariirka dhaliya

S=ibnu siinaa muxuu ahaaa ?

J=waxa uu ahaa seynis yahaankii ugu horeeyay ee ka hadla waxa loo yaqaan dhul go,a iyo gardunka wuxuuna ka midyahay sababaha foolkaanada

S=caalimkaan muxuu tilmaamay?

J=caalimkaan waxa uu tilmaamay in dhulgariirka sabab uu unoqonkaro ilo biyo ah oo dhulka dushiisa ah, wuxuu kaloo tilmaamay sameysanka buuraha ay sabab u tahay waxyaabaha caro guurka iyo dhaqdhaqaaqa dhulka gaar ahaan kor usookaca

cubeya